

Gacaliye Waalidiin,

Macallimiinta ilmahaagu waxay u baahan yihii inayogaadaan waxay ardaydeenu hore u yaqaaneen iyo waxay weli u baahan yihii inay bartaan si aan markaa u qorsheyno sida ugu wanaagsan ee iyaga wax aan u barayno. Imtixaanka *i-Ready* wuxuu naga caawin karaa, inaan helno macluumaadkan oo loogu talagalay canug kasta, laakiin waa haddii ardaydu dadaal wanaagsan la yimaado iyadoo cid kale aysan ka caawineynin jawaabaha.

Waa tan sida aad u caawin karto:

1



Fuurso fiidiyowgan

si wax uga baratid Imtixaanka iyo sida ugu fican ee aad u taageeri kartid canuggaaga.

2



Is abaabul

adigoo u helaya meel deggan oo ardaygaagu ku galoo imtixaanka isla markaana u xaqiijiya in teknooliyada si fican u shaqeyneyso.

3



Ku Dhiirrigeli canuggaaga

adigoo u sharraxaya sida ugu fican ee ay wax u tarayaan macalimiintooda waxay ka ogaanayaan sida si wanaagsan wax loo baro.

4



Taageer, laakiin HA caawinin

adigoo ku dhiirrigelinaya canugaaga inuu diirada saaro oo iskudayo sida ugu fican oo HA ka caawinin jawaabaha.

5



U dabaaldeg dadaalka canugaaga

mar haddii aad xaqiijiso inay dhammaystireen qiimaynta/ imtixaanka.



Liiska Hubinta Qoyska

ee loogu talagalay Maarataynta Imtixaanka i-Ready guriga dhexdiisa

Macallimiinta ilmahaagu waxay u baahan yihiin inay ogadaan waxay ardaydeenu hore u yaqaaneen iyo waxay weli u baahan yihiin inay bartaan si aan markaa u qorsheyno sida ugu wanaagsan ee iyaga wax aan u barayno. **Imtixaanka i-Ready** wuxuu naga caawin karaa inaan helno macluumaadkan oo loogu talagalay canug kasta, laakiin waa haddii ardaydu dadaal wanaagsan la yimaado iyadoo cid kale aysan ka caawineynin fahmidda ama ka jawaabbida su'aallaha. Imtixaankan caadiga ah lagu bixiyaa ama lagu qaataa dugsiga, laakiin markan, waxaan ubaahanahay ardayda inay guriga ku qaataan. Ilmahaagu wuxuu ka faa'iidaysan doonaa taageeradaada iyo dhiirrigelintaada si loo hubiyo in macluumaadka la helay uu si sax ah uga tarjumayo waxay yaqaaneen iyo waxa ay weli u baahan yihiin inay wax ka bartaan. Wuxaan aad kuugu mahadnaqaynaa iskaashigaaga. Halkan waxaa ku qoran liis-hubinta-tallaabo-tallaabo ah oo wax tari kara

Naftaada Baro

- Fiirso fidiyowgan si wax uga baratid Imtixaanka** iyo sida ugu fican ee aad u taageeri kartid canuggaaga.

Is Abaabul

- Raadso meel deggan** oo aad ugu talagalayso in ilmahaagu Imtixaanka ku qaato.
- Go'aanso waqtii aad** ugu talagalayso in ilmahaagu Imtixaanka qaato. Macallinka canuggaaga waxaa laga yaabaa inuu ku qoro waqtii AMA waxaa lagu weydiisan doonaa inaad adigu go'aansato waqtii kuu gaar ah. Haddii aad kaligaa doorato wakhti kuu go'an, maskaxda ku hay waxyaabaha soo socda:
 - Imtixaankan saacad la isuma qabto. Wuxaan soo jeedineynaa inaad imtixaanku u kala qeybiso dhown fadhi oo gaagaaban: 15–20 daqiqadood oo loogu talagalay ardayda da'da yar (K-1) iyo 30 daqiqo oo loogu talagalay ardayda waaweyn.
 - Wuxaan kugula talineynaa inaad la sameeyo horraanta subaxda markii ay suurta gal tahay.
- Hubso inaad haysid macluumad sax ah ee lagu galo oo macallinka canuggaaga ah aad ka hesho.**
- Tijaabi aaladda (yada) ilmahaagu u adeegsan doono inuu ku qaato Imtixaanka.** Tijaabi nidaamka hubinta tsi loo xaqijiyo in kombuyuutarrada ay si fican u shaqeynayaan. Ka fiiri hagahan haddii aad ubaahantahay caawimo dhanka galida ah. Xaqiji in makarafoonka iyo codku shaqeynayaan.
- U diyaari warqad iyo qalin qoriyaalka** oo aad ugu talagalayso in ilmahaagu sticmaalo inta lagu gudajiro Imtixaanka.

Ku Dhiirrigali Canuggaaga

- U sharax canugaaga (waad isticmaali kartaa jumladdahan inay kaa caawiyaan):**
 - Sababta ay u qaadayaan Imtixaankan, oo ku dhiirrigeli inay intii karaankooda ah sameeyaan
 - Sida uu u shaqeeyo Imtixaanka
 - In adigu aadan ka caawin karin wax su'aalo ah

Taageer Ilmahaaga

- La soco oo dhiirigali ubadkaaga** inta ay lmtixaanka qaadanayaan. Isticmaal jumladahan taageerada ah canuggaaga inta lagu jiro qiimaynta.
- HA ku caawin ilmahaaga inaad uga jawaabto su'aalaha qiimeynta**, tani waxay u horseedi kartaa macalinku inuu helo macluumaad aan sax ahayn iyo/ama casharo interneet ah oo aan ku habboonayn ubadkaaga.

Xaqiji Dhameystirka oo Dabaaldeg

- Hubso in ilmahaagu si buuxa u dhammaystiray qiimaynta oo dhan.** Ilmahaaga ayaa waxaa u soo bixi doona farriin hambalyo ah iyo waxaa shaashadooda ugu soo baxaya casharada. Hubso in ilmahaagu ka soo baxo *i-Ready* koontada kadib marka uu dhamayso qiimaynta. Haddii ay dhibaatooyin soo baxaan, la xiriir macallinka ilmahaaga si aad u heshid taageero.